FAAFINTA RASMIGA

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 11aad Muqdisho, 2 Luulyo 1983 L. 7

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D. S. QIIMADU Waa 5 Shan lambar walba—RUKUNKA: Sannadii waa Sh. So. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Sh. So. 300 Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wu xuu ka bilaabmaa 1 Janayo Qiimaha qeritaanku F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa 2 laba Ih. Rukunka & qorista nka waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmi ga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O B N I I N

GAYBTA **KOOWAAD**

S H A R C I

SHARCI L. 11 ee 15 Juunyo 1983, Oggoaansho Heshiis amaaheed oo dhexmaray J. D. S. iyo Hay'adda Caisse Centrale de Cooperation, looguna tala galay dhameystirka Warshadda Shamiintada Berbera. BOG. 416

SHARCI L. 12 ee 20 Juunyo 1983, Oggolaansho Heshiis amaah oo dhexmaray J. D. S. iyo Sanduuqa Carbeed ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, looguna tala galay Wadada Afgooye Baydhabo. » 417

Wakaaladda M. Qaranka

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER SHARCI L. 4 ee 15 Juunyo 1983, kuna saabsan Horumarin Abaalgud. » 418

XEER SHARCI L. 5 20 Juunyo 1983, kuna saabsan Canshuurta Shatiyada gedidda Sigaarka iyo Tarraqa. » 419

XEER SHARCI L. 6 20 Juunyo 1983, kuna saabsan Canshuurta Dawladda Hoose ee loo saaray Bansiinka. » 420

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 15 ee 15 Juunyo 1083, meel marin Heshiis dhexmaray JDS iyo Hay'adda Caisse Gentrale de Cooperation, looguna tala galay dhameystirka Warshadda Sh. Berbera. » 421

DECREE MADAXWEYNAHA N. 15 on 15th Jun. 1983, Instrument of ratification. » 422

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 16 ee 20 Juunyo 1983, Meel marin Heshiis dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta dhaqaalaha iyo Bulshada, looguna tala galay Wadada Afgooye Baydhabo. » 423

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ١٦ بتاريخ . . . . . .
بشأن التصديق على الاتفاقية المبرمة بين حكومة جمهورية
الديمقراطية والصندوق العربى الاقتصادى والاجتماعى
للمساهمة فى تمويل مشروع انغوى — بيدوا . ٤٢٥

XEaaR MADAXWEYNAHA JDS L. 17 ee 23 Juunyo 1983, Beddelaad Magaca Ururka Carabta u Qaabilsan Dalxiiska » 426

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 18 ee 23 Juunyo 1983, dib u hagaajinta Lacageed » 427

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.—

MAXKAMADDA GOBOLKA SH/HOOSE 11.6.83, Lumid Buug Kayd L. 1081/7 ku qoran Cabdulaahi Xaaji Cumar L. 268 » 429

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 5.6.83, Lumid Buug Keyd L. 12805 ku qoran Saalax Xuseen Yaxye L. 269 » 430

SOCIETA INCREMENTO PRODUZIONA LE AGRICOLE S. I. P.A. EXL OGEY SIIS U YEERID SHIR CAADI AH IYO MID AAN CAADI AHAYN L. 270 » 431

SOCIETA INCREMENTO PRODUZIONA LE AGRICOLE S. I. P. A. AVVISO DI CONVOCAZIONE ASSEMALEA L. 271 » 432

SHIRKADDA BEER TACBKA LUUL S.P.A. OGEYSIIS U YEERID SHIR CAADI AH IYO MID AAN CAADI AHAYN L.272 » 433

SHIRKADDA BEER TACBKA LUUL S.P.A. AVVISO DI CONVDCAZIONE ASSE MALEA ORDI NARIA E STRAORDI NARIA L. 273 » 434

QAYBTA KOWAAD

Sharci Lambar 11 taariikh 15 Juunyo 1983 Oggo laansho Heshiis amaaheed oo dhexmaray JDS iyo Hay' adda Caisse Centrale de Cooperation, looguna talo ga lay dhammeystirka Warshadda Shamiintada Berbera ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

MADAXWEYNAHA J. D. S.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta heshiiska dhexmaray J. D. S. iyo Hay'adda Caisse Centrale de Cooperation, kuna saabsan amaah lacageed oo dhan (F.F. 27.000.000), looguna tala galay dhammeystirka Warshadda Shamiintada Berbera.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday magaalada Muqdisho, taariikhdu markay ahayd 30.4.1983.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobada heshiiska ku tilmaaman qod. 1aad ee Sharcigan wuxay leeyihiin qiimo iyo astaan Sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka dalka, waxaana dhaqangelintooda la waa fajinayaa Dastuurka J. D. S. iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta la gu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 15 Glu. 1983

MADAXWEYNAHA J. D. S.

Sharci lam. 12 taariikh 15 Juunyo 1983 oggolaansho heshiis amaah oo dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Carbeed ee Horumarinta dhaqaalaha iyo Bulshada, looguna talagalay Waddada Afgooye Baydhabo.—

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta heshiiska dhexmaray J. D. S. iyo Sanduuqa Carbeed ee Horumarinta dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan amaah laca geed oo dhan (5.000.000 D.K.), looguna tala galay dhismaha Waddada Afgooye Baydhabo.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Kuweyt, taariikhdu markay ahayd 7.4.1983.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobada heshiiska ku tilmaaman qod. 1aad ee sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah sharciyada iyo xeerarka Dalka, waxaana dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka J. D. S. iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 20 Gul. 1983

MADAXWEYNAHA J. D. S.

(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA LABAAD

XEER

Xeer Sharci Lr. 4 ku saabsan Abaalgud

MADAXWEYNAHA J. D. S.

ASAGOO ARKAY: Qod. 69 ee Dastuurka J. D. S.

ASAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 4 ee 3.4.1983.

ASAGOO GARAWSADAY: Lagama maarmaanimada in dantii laga lahaa laga gaaro qodobka 9aad ee Sharciga ku xusan.

WUXUU SOO SAARAYAA Sharciga Soo Socda

Qod. 1aad

Abaalgudka ku xusan qodobka 9aad ee Sharciga Lr. 4 ee 13.4.83 waxaa Maxkamadda u hormarinaysaa Wasaaradda Maaliyaddu iyadoo ka bixinaysa madax xige 1.2.8. (T) Kharashka abaalgudka kontorobaanka ee Miisaaniyadda 1983, sannadyada soo socdana madax xigihii loogu tala galo.

Jod. 2aad

Si lacagtaan loogu hormariyo, Maxkamaddu waa inay bil walba u soo gudbisaa isuduwaha Wasaaradda Maaliyadda ee Gobolka bayaan ay ka muuqdaan xuku madii ay bishaas guddoomisay ganaaxii la saaray iyo abaalgudka waajibay. Gobolkii uusan joogin isuduwaha Wasaaradda Maaliyadda bayaanka waxaa loo gudbina yaa Xisaabiyaha Gobolka, Xamarna bayaankaas waxaa loo soo guddbinayaa waaxda Maamulka Lacagta ee Wasaaradda Maaliyadda.

Waaxda Maamulka Lacagta ee Wasaaradda Maaliyadda, Isuduwaha Wasaaradda Maaliyadda, ama Xisaabiyaha Gobolka markii ay Maxkamaddu soo gaarsiiso bayaanka kor ku qoran waxaa waajib ku ah inuu Maxkamadda u sameeyo Voucher qeybta abaalgudka Waajibay.

Qod. 3aad

Xeer Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J. D. S. waana in loo gudbiyaa Golaha Shacbiga si uu u rasmiyeeyo, Sharcigan waxaa kale ee lagu dabaqayaa dhammaan Xukunnadii ay Maxkamaduhu guddoomiyeen laga soo bilaabo dhaqan gelkii Xeer Sharci lambar 2 ee 18.3.1983.

Muqdisho, 15 Giu. 1983

MADAXWEYNAHA J. D. S.

Maxamed Siyaad Barre

Xeer Sharci L. 5 ee ku saabsan Canshuurt Shatiga Gedidda Sigaarka iyo Tarraqa.—

MADAXWEYNAHA J. D. S.

ASAGOO ARKAY: Xeer Sharci 23.2.59, kuna saabsan Canshuurta Shatiga gadidda Sigaarka iyo Tarraqa.

ASAGOO GARAWSADAY: Inay haboon tahay kordhinta Canshuurta Shatiga gedidda Sigaarka iyo Tarraqa.

IYADOO UU SOO JEDIYEY: Wasaaradda Maaliyadda WUXUU SOO SAARAY SHARCIGA SOO SOCDA.

Qod. 1aad

Canshuurta Shatiga gedidda Sigaarka iyo Tarraqa wc la mideeyay, laga bilaabo dhaqan galka Sharcigan waxaana laga dhigay Sh. So. 200 (laba boqol sanadkii

Qod. 2aad

Shatiga waa in la cusbooneeyo sanad walba ilaa 31 Maarso. Muddadaas ka dib waxaa Canshuurta raacaya ganaax dhan Sh. So. 25% waana mamnuuc in badeeco lagu bixiyo Shati aan la cusboonayn.

Qod. 3aad

Bixinta Shatiga waxaa awood u leh Maareeyaha Guud ee Warshalla Sigaarka iyo Tarraqa Canshuurta Shatiga waxay ka mid noqoneysaa Dakhliga guud ee Warshadda Sigaarka iyo Tarraqa.

Qod. 4aad

Sharci kasta ee kan ka soo horjeeda ama aan la sc con karin waa in burriyay.

Qod. 5aad

Xeer Sharcigaani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J. D. S. Waana in loo gudbiyo Golaha Shacbiga si uu u rasmiyeeyo.

Muqdisho, 20 Giu. 1983

MADAXWEYNAHA J. D. S.
Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

Xeer Sharci Lr. 6 kuna xusan Canshuurta Dawladda Hoose-ee loo saaray Bansiinka.—

ISAGOO ARKAY: Qod. 69 ee Dastuurka J. D. S.
ISAGOO ARKAY: Sicir Dhiska Shidaalka.

ISAGOO GAROWSADAY: Inuu hoos u dhacay Dakhliga D. Hoose Xamar ayaanna suuragal ahayn in la dhimo adeegga looga baahanyahay.
IYADOO U SOO JEEDIYEY: Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

ISAGOO DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirada.
WUXUU SOO SAAMAYAA Sharciga Soo Socda

Qod. 1aad

Laga bilaabo dhaqangalka Xeer Sharcigan waxaa Dawladda Hoose loo saaray 0,50 (Nus Shillin) oo Canshuur ah Liitarkii Bansiin ah.

Qod. 2aad

Carshuurtaas waxaa soo ururinaysa Wakaaladda Batrooska Ummadda iyadoo ku kordhinaysa sicirka basiinka waxayna u soo gudbinaysaa Dawladda Hoose ee Xamar ugu dambeyn Bisha xigta shan iyo tobankeeda bishii canshuurta ay Wakaaladdu ururisay, iyadoo la cag bixinta ku soo lifaaqaysa bayaan muujinaaya baansiinka bishaas Dalka laga isticmaalay.

Qod. 3aad

Xeer Sharcigaan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J. D. S. Waana in loo gudbiyaa Golaha Shacbiga si uu Sharciga ugu rogo.

Muqdisho, 20 Giu. 1983

MADAXWEYNAHA J. D. S.

Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

Xeer Madaxweynaha J. D. S. lambar 15 taariikh 15.6.83, Meel marin Heshiis dhexmaray J. D. S. iyo Hay' adda Caisse Centrale De Cooperation, looguna tala ga lay dhammaystirka Warshadda Shamiintada Berbera.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67 (5) iyo 81(4) ee Dasturka

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay ——— ee Sharcigaasoo Golaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiska Xeerkan ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan ta hay in la meelmariyo Heshiiskaas.

WUXUU SOO SAARAYAA Sharciga Soo Socda

Qod. 1aad

Heshiiska amaaheed ee dhexmaray Dawladda JDS, iyo Hay'adda Caisse Centrale De Cooperation, laguna kala saxiixday magaalada Muqdisho 30kii Abriile 1983, kuna saabsan dhammeystirka Warshadda Shamiintada Berbera, waa la meelmariyey.

Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu ku yeelanayaa Dalka J. D. S. Awood Sharci, dhaqangalkiisuna waxa uu ka billaabana yaa maalinta lagu soo saaro Xeerkan Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 15 Glu. 1983

MADAXWEYNAHA J. D. S.

(Maxamed Siyaad Garre)

Decree No 15 of 15 Jun. 1983 Instrumet of ratification.
of ratification.

THE PRESIDENT OF S. D. R.

HAVING SEEN: Article 67 (5) and Article 82 (4) of the Constitution of S. D. R.

HAVING SEEN: The Law no of on the base of which the People's Assembly has approved the Agreeme nt specified in this Decree.

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement.

HEREBY PROMULGATES

Article I

The Agreement between the Government of Soma li Democratic Republic and Caisse Centrale De Coope ration Economique for the Government of France, con cerning Cement Project at Berbera and Signed at Mo gadishu 30 April, 1983, Is Hereby Ratified.

Article II

This Agreement shall have the force of law in the Territory of the Somali Democratic Republic and shall enter into force upon the date of it's publication in the Official Bulletin.

Muqdisho, 15 Giu. 1983

THE PRESIDENT OF S. D. R.

(Mohamed Siad Barre)

Xeerka Madaxweynaha JDS, Lambar 16 taariikh 20 Juunyo 1983 Meelmarin Heshiis dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Carbeed ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, looguna tala galay Waddada Afgooye Baydhabo.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qodobada 67 (5) iyo 28 (4) ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay —— ee Sharcigaasoo Golaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiska Xeerkan ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in la meelmariyoheshiiskaas.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Heshiiska amaaheed ee dhexmaray Dawladda JDS, iyo Sanduuqa Carbeed ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, laguna kala saxiixday Magaalada Kuweyt 7dii Abriil 1983, kuna saabsan amaah lacageed oo loogu tala galay Waddada Afgooye Baydhabo, waa la Meelmariyay.

Qod. 2aad

Heshiiskan wuxuu ku yeelanayaa Dalka J. D. S. awood Sharci, dhaqan galkiisuna waxa uu ka billaabanayaa maalinta lagu soo saaro Xeerkan Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 20 Giu. 1983

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

جمهورية الصومال الديمقراطية

الرئاسة

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ١٦ بتاريخ .. . .
بشأن التصديق على الاتفاقية المبرمة بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية والصندوق العربى للانماء الاقتصادى والاجتماعى للمساهمة فى تمويل مشروع أفقوى — بيدوا .

رئيس الجمهورية

بعد الاطلاع على الفقرة الخامسة من المادة ٦٧ والفقرة الرابعة من المادة ٨٢ من الدستور ..

وعلى القانون رقم ١٦ الصادر فى والذى بموجبه وافق مجلس الشعب على الاتفاقية البينة فى هذا المرسوم .

ونظرا للضرورة الدامية الى التصديق على الاتفاقية السالفة الذكر .

يرسم

بما هو آت :

المادة الاولى

تم التصديق على اتفاقية القرض المبرمة بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية والصندوق العربى للانماء الاقتصادى والاجتماعى الموقع عليها فى مدينة الكويت بتاريخ ١٧ أبريل ١٩٨٣ ، والمتعلقة بالمساهمة فى تمويل مشروع طريق أفقوى — بيدوا .

المادة الثانية

تكون للاتفاقية قوة القانون فى قطر جمهورية الصومال الديمقراطية ويجرى العمل بها ابتداء من تاريخ نشر هذا المرسوم فى الجريدة الرسمية للجمهورية .

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 17 ee 23 Juunyo 1983 Beddelaad Magaca Ururka Carabta u qaabilsan Dalxiiska.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka J. D. S.

MARKUU ARKAY: Go'aankii Golaha Dawladda ee 9.6.1983.

WWUXUU SOO SAARAYAA Xeerka soo socda:—

Qol. 1aad

Waxaa la oggolaalay in Magacii hore oo ahaa «Isu tagga Dalxiiska Carbeed» (Arab Tourism Union) hadla loo beddelo «Ururka Dalxiiska Carbeed» (Arab Tourism Organisation).—

Qod. 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J. D. S. Waxaana lagu soo saa rayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 23 Glu. 1983

MADAXWEYNAHA J. D. S.

Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 18 ee 23 Junyo 1983
Dib u Hagaajin Lacgeed.

MADAXWEYNAHA J. D. S.

ASAGOO ARKAY: Dastuurka J. D. ee Soomaaliya.

ASAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 12 ee 26.9.1964 Qodob kiisa 8aad.

ASAGOO AQOONSADAY: Baahida loo qabo in la kor dhiyo qiimaha Qaababka (A) iyo (B).

ASAGOO AQOONSADAY: Baahida loo qabo in la kor dhiyo Kharajka laga qaado Shatiga Dhoofinta Dejinta (Import Export License).

WWUXUU SOO SAARAYAA Xeerka soo socda:—

Dib u Hagaajjinta Lacageed

Qod. 1aad

Qiimaha Qaababka (A) iyo (B) halkay ka ahaayeen Sh. So. 2 waxaa laga dhigay Sh. So. 10 midkiiba.

Qod. 2aad

Cusboonaysiinta, Beddelaadda iyo Kordhinta Qaa babka (A) iyo (B) Wasaaradda Ganacsigu waxay qaa dan doontaa midkiiba Sh. So. 5

Qod. 3aad

Wasaaradda Ganacsiga waxaa awood loo siiyey in ay ka qaado qofkasta oo loo oggolaado Shatiga Dhoofin ta Dejinta (Import Exprt License) Lacag dhan ShS. 100.

Qod. 4aad

Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed wuxuu u soo gudbin doono Bil walba Wasaaradda Ganacsiga Farqiga ku kordhay Qaababka «A» iyo «B» ee ku xusan qod. 1aad

Waxaa taa dan looga leeyahay daryeelka Shaqaala ha iyo Shaqo wanaagsanaata.

Qod. 5aad

Xeer kasta oo ka soo horjeeda qod. xeerkanama aan la socon karin waa la baabi'iyey.

Qod. 6aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 23 Glu. 1983

MADAXWEYNAHA J. D. S.

Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

MAXKAMADDA GOBOLKA SH HOOSE MARKA

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. SH. HOOSE.

HADDUU ARKAY: Dacwadda Kor ku Qoran.

HADDUU ARKAY: In Buugga Kayd lumay lam. yahay 1081/7, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Q/Yooley, kuna qor neyd Lacag dhan Sh. So. 2,200 (laba kun laba boqol) uuna lahaa Cabdulaahi Xaaji Cumar Maxamed, si da ku cad warqadda lam. yahay 0075, Taar. tahay 8.680, eeBankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaali yeed Laanta Q/Yooley.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharci Lamb. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la Baabi'iyo (Ammortamento) Buugga Keyd Lr. 1081/7, ee ku qoran Cabdullaahi Xaaj Cumar Maxamed ayna ku jirto Lacag dhan Sh. So. 2,200 (laba kun labo boqol).

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Q/Yooley u bedesho Cabdullaahi Xaaji Cumar Maxamed, Buugga Keydka Lam. kor ku tilmaaman, una sameeyo mid la mid ah, ka dib markay ka soo wareega to muddo aan ka yareen 30 Maalmood, maalinta Go'aan ka lagu Daabaco Faafinta Rasmiga J. D. S. Haddii inta ka horeysa wax is hortaag ah laga keenin.

Marka 11.6.83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. SH. HOOSE.
Maxamed Keynaan Warsame

L. 268

MAXKAMADDE GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDUU ARKAY: In Buug Keyd Dhumay oo lambar kiisu ahaa 12805 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta 3aad kuna qo kh 5.6.83 oo bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaran lacg dhan Sh. So. 1.801 uu iska lahaa Saalax Xuseen Yaxye sida ku cad warqadda lamb. 00404taariiliyeed laanta 3aad.

HADDUU ARKAY: Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd lam. 12805 oo ku qoran magaca Saalax Xuseen ayna ku jirto lacag dhan Sh. So. 1.801/=.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 3aad u beddelo Salaxa Xuseen Yaxye Buugga Keydka, ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalintta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is-hortaag laga keenin.

Muqdisho, 5.6.83

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 269

SOCIETA' INCREMENTO PRODUXIONI AGRICOLE- S.I.P.A.-

Saldhiggeedu yahay Shalambot - J.D. Soomaaliya —

Ra'asumaal la wada bixiyay Sh. So. 3.112.000-
OGEYSIIN U YEERID SHIR CAADI AH IYO MID AAN CAADI AHEYN.

Saamileyda Shirkadda SOCIETA' INCREMENTO PRODUZIONI AGRICOLE- S.I.P.A. — S.P.A., waxaa ka isugu yeerayaa Shir caadi ah iyo mid aan caadi ahayn, oo lagu qaban doono Muqdisho, Jidka Jubada Sare lambar 6 - 20, maalinta 20ka Luulyo 1983, marka ay saacaddu tahay 10ka subaxnimo, haddii loo bahdo Shirka waxaa mar labaad la qaban doonaa 26ka Luulyo, isla saacadda iyo meesha kor ku xusan, si looga doodo, go'aanna looga gaaro arrimaha soo socda:

ARRIMAHA DOODDA

— QEYBTA CAADIGA AH:

1) Magacaabid Guddiga Maamulka iyo xaddidaad tirada xubnaha Guddiga.
2) Magacaabid Guddiga Baarista.

— QEYBTA AAN CAADIGA AHAYN:

1) Beddelid Qodobka 6aad — Madaha labaad — Xeerka Shirkadda.

Waxaa xaq u yeelanayaan in ay ka soo qeyb galaan Shirka, Saamileyda ku qoran Diiwaanka Saamileyda ilaa shan maalmood ka hor maalintta la qaban doono shirka.

GUDDIGA MAAMULKA

SOCIETA' INCREMENTO PRODUXIONI AGRICOLE-S.I,P.A.-

Sede sociale Shalambot — Repubblica Democratica Somala —.

Capitale sociale interamente versato Shs.So. 8.112.000,-
AVVISO DI CONVOCAZIONE ASSEMBLEA ORDINARIA E STRAORDINARIA.-

I Signori Azionisti della SOCIETA' INCREMENTO PRODUZIONI AGRICOLE — S.I.P.A. — S.P.A. sono convocati in Assemblea Ordinaria & Straordinaria in Mogadiscio, Via Alto Giuba 6-20, per il giorno 20 Luglio 1983, alle ore 10, ed, occorrendo, in seconda convocazione per il giorno 26 Luglio, alle stessa ora e nello stesso luogo, per discutere e deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIARNO

— Parte Ordinaria:

1) Nomina del Consiglio di Amministrazione previa determinazione del numero dei suoi membi.
2) Nomina del Collegio Sindacale.

— Parte Straordinaria:

1) Modifica dell' art. 6 - Titolo II° - dello Statuto Sociale.

Avranno diritto di intervenire all' Assemblea gli Azionisti inscritti nel libro Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l' Assemblea.-

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

L. 271

SHIRKADDA BEER-TACABKA LUUL —S.P.A.
Saldhiggeedu yahay Muqdisho

Ra'asumaal la wada bixiyay Sh. So. 1.100.000,-

OGEYSIIN U YEERID SHIR CAADI AH IYO MID AAN CAADI AHAYN.

Saamileyda Shirkadda Beer-tacabka Luul -S.P.A. waxaa la isugu yeerayaa Shir caadi ah iyo mid aan caadi ahayn, oo lagu qaban doono Muqdisho, Jidka Jubada Sare 6-20, maalinta 20ka Luulyo 1983, marka ay saacaddu tathay 12ka, haddii loo baahdo Shirka waxaa mar labaad la qaban doonaa 26ka Luulyo, isla saacadda iyo meesha kor ku xusan, si looga doodo, go'aanna looga gaaro arrimaha soo socda:

BARNAAMIJKA DOODDA
— QAYBTA CAADIGA AH:

1) Magacaabid Guddiga Maamulka iyo xaddidaad tirada xubnaha Guddiga.

2) Magacaabid Guddiga Baarista.

— QAYBTA AAN CAADIGA AHAYN:

1) Beddelid Qodobka 6aad — Madaha Labaadee Xeerka Shirkadda.

Waxaa xaq u yeelanayaan in ay ka soo qeyb galaan Shirka, Saamileyda ku qoran Diwaanka Saamileyda ilaa Shan maalmood ka hor maalinta la qaban doono shirka.

MAAMULAHA KELI AH

SHIRKADDA BEER TACABKA LUUL —S.P.A.—

Sede Sociale : Mogadiscio

Capitale Sociale interamente versato Shs.So. 1.100.000,-

AVVISO DI CONVOCAZIONE ASSEMBLEA ORDINARIA E STRAORDINARIA.-

I Signori Azionisti della Società SHIRKADDA BEER TACABKA LUUL — S.P.A« — sono convocati in Assemblea Ordinaria & Straordinaria in Mogadiscio, Via Alto Giuba 6-20, per il giorno 20 Luglio 1983, alle ore 12, ed occorredndo, in seconda convocazione per il giorno 26 Luglio, alla stessa ora e nello stesso luogo, per discutere edeliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

— PARTE ORDINARIA:

1) Nomina del Consiglio di Amministrazione previa determinazione del numero dei suoi membri.

2) Nomina del Collegio Sindacale.

— PARTE STRAORDINARIA:

1) Modifica dell' art. 6 - Capitolo 2 - dello Statuto Sociale.

Avranno diritto di intervenire all' Assemblea gli azionisti Inscritti nel Libro Soci almeno cinque giornI prima di quello fissato per l' Assemblea.

L' AMMINISTRATORE UNICO

L. 278